MUHAAJIRIINTA MAINE

Muhaajiriinta waxay kaalin weyn ka geysteen wax ka bedelida dhaqanka iyo dhaqaalaha maine ilaa markii laga soo bilaabo tan iyo markii laga aas asaay gobolkaan maine.laga bilaabo maantadaan, ururka ILAP wuxuu ku qiyaasay dadka muhaajiriinta ee ku soo biiray maine inta u dhaxeeyso 46,000-56,000 qofood, waxeyna ka kala yimaadeen dalal ka badan 100 wadan.

Dadkaan badankooda iyo qoysaskooda oo heysta dhalashada wadanka Mareykanka waxay u baahan yihiin in laga caawiyo dhinaca sharciga deganaanshaha, sida buuxinta codsiyadaha deganaanshaha,u dacwoodida qoysaskooda si ey mareykanka u imaadaan, iyo biixinta codsiyadaha qaadashada dhalashada mareykanka.

Madaama la xadidey dhaqaalaha dowlada xageeda ka yimaada, dadka sida rasmiga ah u siiya adeegyada sharciyada dadka dhaqaalahooda uu hooseeyo ma caawin karaan dad badan oo aan dhalashada mareykanka aan heysan. Inta badan dadka dhaqaalahoodu uu yar yahay ma qabsan karaan looyar(abukaate) qaas ah.

ILAP waa ururka keliya oo bixiya macluumaadka sharciga muhaajiriinta iyo caawinta sharciyadaha dadka dhaqaalahoodu uu hooseeyo ee ku nool gobolka maine ee aan awood u leheyn in ey qabsadaan looyar(abukaate) qaas ah. ILAP waxa ey hada u shaqeysaa ilaa iyo in ka badan 2000 oo qof sanadkii.

ILAP shaqadeeda waxaa u suurto geliyey shaqsiyado ugu deeqey dhaqaalahooda iyo shirkado. ILAP waxay ka tirsan tahay aas aaska loogu magac daray ' Maine Bar foundation, isku taga weyn ee Portland. iyo kaniisada Lutheren oo bixisa ama kalkaalisa dadka qaxootiga ah iyo kuwa muhaajiriinta / kaniisada Presbyterian ee dadka dhibaateysan caawisa, ILAP waxay kaloo lacag yar ku qaadataa shaqooyinka qaarkood si ay barnaamijka u socodsiiso.

Waxii Warbaxin Dheeraad Ah oo ku saabsan ILAP, Fadlan kala xiriir websaytka www.ilapmaine.org.

ILAP Shaqadeeda waa Bilaash ama lacag jaban taasi oo ku xiran dhaqaalahaaga. Qofne looma diidaayo waxqabadka hadii uu awoodi waayo in uu iska bixiyo qarashka.

ILAP waa qolo aan meelna ku tiirsaneeyn 501(c)(3) Urur aan qofna taakuleeyn.

HOWLAHA SHARCIYADA EE SIDA TOOSKA AH AY UQABATO HEYA'DA ILAP

Looyar (abukaate) aad la tashato

Waxaad heli kartaa aqbaar rasmi ah oo ku saabsan arrimaha immagareeshinka qof aad la tashato oo bixiyo adeegyada ayaad ka heli kartaa magaalooyinka Portland iyo Lewiston-Auburn. qofkii jooga gobolada kale wuxuu la tashan karaa looyar (abukaate) taleefoonka ah adiga oo wacaaya taleefoonka. *Fadlan ku xawil Rugta imagareeshinka qeybteeda arimaha socdaalka wixii balan kusaabsan.*

Caawimida Codsiyaasha Deganaanshaha

Waxaad heleysaa caawin codsiyaalka deganaanshaha iyada oo lacag la,aan ah ama lacag jaban ah. *Fadlan ku xawil Rugta imagareeshinka qeybteeda arimaha socdaalka wixii balan kusaabsan.* Codsiyaalka aan aad u sameeyno waxaa ka mid ah green karaka, dhalashada mareeykanka, sharciga ogolaanshada shaqada iyo sharciga ilaalada ku meel gaarka ah.

Difaacid Buuxa ooSharciga ah

Bilaash ama qiimo jaban oo loogu doodaayo qofkii uu dhaqaalahooda uu hooseeyo dhibne ku qaba sharciga deganaanshaha. Difaacid buuxa oo kamid ah,difaacid soo saaris,codsiyaalka isdhiibista, caawinta dhibaatooyinka qoysaska soo gaaro oyo kuwa ka badbaado,codsiyaalka deganaanshaha qoyska(Imaagireeshinka), iyo waxyaabaha dhalashada mareeykanka ku xiriira. Talaabada ugu horeyso waxey tahay in aad hesho wakiil buuxa ee uu kusiiyo talo bixin qof qareen/looyar ah ee kasocda rugteena imagareeshinka iyo arimaha socdaalka.

HOWLAHA KALE EE DHEERADKA AH EE'AY ILAP LEEDAHAY

Tababar Sharciyada Bulshada

Tababar la xirrira waxyaabaha quseeya immaagireeshinka waxtarne u leh bulshada aad wax u qabatid. Waxaan bixinaa tababar ku saabsan sida looga hor tago dhibaatooyina qoysaska, isbitaalada, iskuulada, iyo meelaha caruurta lagu xanaaneeyo, kaniisadaha, masaajidyada,iyo xafiisyada dadweynaha wax loogu qabto,iyo wixii la mid ah.

Tacliinsiinta iyo kulminta

Kulminta jaaliyadaha degan si looga hadlo waxyaabaha cusub ee la xiriira immaagareeshinka, sida dastuurka iyo sharciyada aad xaqa u leedahay ee quseeya gareeshinka iyo sharciyada hada soo baxay iyo sida loogu haqmaayo.

ILAP's RUGTA SOCDAALKA

Si aad u hesho caawinaad howlaha sharciga kusaabsan, Cidii gobolkan Maine kunool waa in ay laxiriiraan rugteena arimaha imigireeshinka si looga qaado warbixin balana laguugu sameeyo.

SIDA BALAMAHA LOO SAMEYSTO

Hadii aad tahay qof cusub ama macmil xiriir hore nala lahaan jiray ILAP ee wata arin cussub. **Jimca walba inta udhaxeysa 9:00-1:00**da duhurnimo inagala soo xiriir taleefoonada **780-1593** ama **1-800-497-8505** ama imow shakhsi ahaan taada. Si lagaaga qaado warbixin ballana aad usameysato.

ILAP shaqaalahooda bilaashka ku shaqeeya ayaa su'aalo kuweydiinaya waxa aad dooneyso iyo nooca caawinaada ee aad ubaahantahy. Hadii aad heysato waraaqo laxiriira arimahaaga fadlan horay usoo qaado kolka aad imaanayso. Hadii aad inasoo wacdo saacadaha kale ee usbuuca, ama aan kolkaas cidina diyaar kuu aheyn, waxaynu ku weydiin doonaa in aad taleefoonkaaga inoo dhaafto kadibna waynu kulasoo xiriiri doonaa.

OGEYSIIN: LAMA KULMI DOONTID looyar/ qareen maalinta ugu horeysa ee aad timaadid balse shaqaalaha bilaashka kushaqeeya ayaa warbixintaada qaadaya. Waxaase, taa badelkeeda laguu sameyndoonaa kolkii warbixinta lagaa qaado qareen ayaa laguu balamindoonaa ama sharciyaqaan qareenka lashaqeeya hadii loobaahdo. Waayo waxa aynu nahay xafiis yar oo ay kashaqeyso sadex qareen oo keli ah. Waxaa lagayaabaa ballantaada in aad sugto ilaa dhowr usbuuc, inkasta oo aan si aad ah isugu taxluujino dadka wakhtiga kadhacayo ama ballan maxkamadeed leh.

Warbixintu waa lacag la'aan. Talo bixitu waa $10 doolar nusisaacihii walba cidii awood uleh.

HADII AAD DEGENTAHAY MEEL KAFOG MAGAALADA PORTLAND

Hadii aad kunooshahay meel kudhow Lewiston ama Auburn. Waxaa aad ka helikartaa talo bixin qareenada ILAP ee jooga Lewilton Multipurpose Center, Khamiista sadexaad ee bilwalba. Hadii aadan u soo safri karin Lewiston ama Portland si aad u hesho talo bixin qareen/looyar. Waxaanu kuu diyaarin karnaa in aan taleefoon kuugu xalino si aad uhesho talo bixin halkii aad inagala kulmi lahayd waji ka waji. Balamahan oodhan waxaa lagu qaada nidaamka qaabilaadeena Jimcaha.

KOR U HEYNTA DHAQANKA MUHAAJIRIINTA EE MAINE

BARNAAMIJKA SHARCI TAAGEERISTA MUHAAJIRIINTA

ILAP

IMMIGRANT LEGAL ADVOCACY PROJECT

Waxaan bixinaa macluumaad iyo sharci caawin qibrad leh oo qiimo jaban ama lacag la,aan (bilaash ah) dadka muhaajiriinta uu dhaqaala-hoodu hooseeyo iyo qoysaskooda dhalashada mareeykanka heysta.

Fadlan nagala soo Xiriir Hadii aad jeceshahay inaad Kaalmo bixiso, ama iskaa wax u qabso ama aad rabto warbaxin dheeraad ah oo ILAP shaqooyinka ay qabato ku saabsan.

ILAP

IMMIGRANT LEGAL ADVOCACY PROJECT
309 Cumberland Avenue, Suite 201
P.O. Box 17917
Portland, ME 04112

ph 207 780 1593
fax 207 699 2313
email: info@ilapmaine.org

www.ilapmaine.org

SHAQADEENA

Inaan u doodno siina hagaajino bogaadinta iyo wax qabadka aan u qabaneyno dadka dhaqaalaha yar ee gobolka Maine iyo qoysaskooda siinta adeegyada sharciyada ay awood u leeyihiin in ay iska bixiyaan iyo waxbarista iyo la shaqeynta kuwa adeegyada bixiya, sharci dajiyaasha,iyo waxyaabaha la xiriira sharciyada dadweynaha oo u gaarka ah dadka aan dhalashada mareykanka aan heysan.